

Office of Superintendent of Public Instruction
Randy I. Dorn, State Superintendent
600 Washington Street SE | Olympia, WA 98504
Telefoonka: 360-725-6000



STATE OF WASHINGTON

Washington Student Achievement Council
Gene Sharratt, Executive Director
917 Lakeridge Way SW | Olympia, WA 98502
Telefoonka: 360-753-7800

Abril 6, 2016

Gacaliye Arday Dugsiga Sare:

Gu'gaan waxaad ka qaybqaadan doontaa imtixaanada qiimaynata Smarter Balanced ee farshaxanka luqadda Ingiriiska (ELA) iyo/ama xisaabta. Imtixaamadaani waa hab wanaagsan oo lagu arki karo haddii aad diyaar u tahay inaad qaadato fasalada heerka kuliyadda ee labada maado ee ay ka kooban yihiin.

Darajada aad heshaa waxa ay ku beegnaanaysa "Heerka Kasbashada" (1 ilaa 4). Ogaanshaha heerkaaga kasbashadu waxay kaa caawin doontaa doorashada koorsooyinka dugsiga sare aad sida ugu fiican u diyaarin doonto si aad ugu guulaysato kadib qalinjabintaada.

Dugsigaagu wuu u heli karaa darajooyinkaaga, si electroonik ah, isla toddobaado dabadood markaad qaadato imtixaanka. Waxaad heli doontaa warqadda koobiga darajooyinkaaga Smarter Balanced oo ka timid dugsigaaga degmada Sebtembar.

Haddii darajadaadu tahay **Heerka 3 ama 4**, Waxa laga yaabaa inaad awooddo inaad ka fogaato qaadashada imtixaanka meelaynta iyo fasalo sixid ah oo lacag ah haddii aad isdiiwaangaliso kuliyadda sannadka aad ka qalinjabiso dugsiga sare. In kabadan 220 kuliyadood, jaamacado, kuliyadaha bulshada iyo farsamad oo dawli ah ama gaar loo leeyahay oo waddanka oo dhana ayaa u oggol ardayda inay isticmaalaan derajooyinka Smarter Balanced si ay u muujiyaan inay diyaar u yihiin hawsha waxbarasho ee kuliyadda. Liiska dhammayskatiran ee kuliyadaha ka qaybqaadanaya, booqo <http://bit.ly/SBA-HigherEd>.

Haddii aad qaadatay mid ama ka badan imtixaanada Smarter Balanced fasalka 10-aad ahaan oo aad kasbatay 3 ama 4, uma baahanid inaad qaadatid imtiixaankaas mar labaad fasalka 11aad. Haddii aanad kasban 3 ama 4 fasalka 10aad, waxaad qaadan doontaa imtixaankaas mar labaad fasalka 11aad.

Haddii darajadaadu tahay **Heerka 2**, Hubso in dugsigaaga sare bixiyo kooraska "Bridge to College" (Biriijka lagu gaaro Kuliyadda) ee ELA ama xisaabta. Koorsooyinkaas degdega ah ee halka sanno ah waxa loogu talagalay si ay u helaan ardaydu kuliyadda iyo xirfad diyaarinta waqtiga ay ka qalinjabiyaan dugsiga sare. Wali waxaad kartaa inaad ka boodo imtixaamada meelaynta iyo hagaajinta koorsooyinka mid kasta oo ka mida 34 kuliyadaha dadweynaha ee bulshada ama farsamo haddii aad kasbato B ama ka fiican kooraska Bridge (Biriijka) oo aad isdiiwaangaliso sannadka aad ka qalin jabiso dugsiga sare.

Haddii darajadaadu tahay **Heerka 1**, wali uma gudbi kartid kuliyad. La shaqee dugsigaaga si aad u hesho taageerada shaqsiga ee aad u baahantahay. Waxaad u baahan tahay inaad qaadato koorsooyin sixid ah haddii aad doorato inaad tagto kuliyad.

Si aad wax badan uga ogaato, booqo www.wsac.wa.gov/college-readiness. Haddii aad qabto wax su'aala, kala hadal macalimiintaada, la-taliyaha dugsiga sare, ama agaasimaha xirfadaha ee xarunta.

Si daacadnimo leh,

Randy I. Dorn
Kormeeraha Guud ee Gobolka ee Waxbarashada Dadweynaha
(State Superintendent of Public Instruction)
Xafiiska Kormeerka Guud ee Waxbarashada Dadweynaha
(Office of Superintendent of Public Instruction)

Gene Sharratt
Agaasimaha Fulinta
(Executive Director)
Guddida Kasbashada Ardayda Washington
(Washington Student Achievement Council)